

Sharci 26 Disember 1958, lamba. 30 diiw.
Dhisid Wakaalad (Hayad) sharci guud oo lagu magacaabo “Wakaaladda madaxabannaan, ee Dekedda Kismaayo”

MAAMULUHU

Markuu arkay oggolaanshaha Golaha Xeerdejinta

WUXUU GUDDOOMINAYAA, SOONA SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

Waxaa la dhisay Wakaalada Sharci guud, oo lagu magacaabo “Wakaaladda Madaxabannaan, ee Dekedda Kismaayo”.

Ujeeddada Wakaaladda waa in ka hawlgasho dhismaha Deked laga hirgeliyo Kismaayo, ayada oo ay lasocdaan dhismooyinka dhismooyinka lagama maarmaanka u ah shaqaynteeda iyo maamulka u gaarka hawlaha dekaddeed iyo waxyaabaha kale ee la xiriira dhaqdhaqaaqa xagga badda aagga.

Wakaaladdu waxaa loo ruqseyn karaa xataa in ay” aag xor ah” oo ayadu maamusho ka sameyso aagga dekedda Kismaayo.

Qod. 2

Wakaalad waxa ay yeelanaysaa raasumaal bilow ah oo ka kooban hanti ay ugu yaboohdo soomaalia, ee aag iyo hanti demaniyaale ah oo ka jirta aagga ay ku taal dekedda Kismaayo iyo wixii kale oo loo aqoonsan karo in ay lagama maarmaan u yihiin xaqiijinta hadafka (ujeeddada) Wakaaladda, iyo weliba deeq lacag ah oo dhan Sh.So. 50.000 oo ay bixineyso Soomaaliya.

Wixii kordhinta raasumaal ah, ee dambe, waxaa ka qaybgeli kara Hayado iyo Wakaalado kale oo daneynaya horumarinta dhaqaale, ee aagga.

Qod. 3

Xagga maalgelinta ku takhaluqda dhisidda dekedda iyo wixii qalab ah oo la xiriira, Wakaaladdu waxa ay u idman tahay in ay soo saarto, toos ahaan iyo ayada oo u mareysa Bangiyada ammaahda oo takhasuska u leh in ay ammaahda u adeegsadaan hirgelinta dhismooyinka guud ee waxtarka leh, waajibaadka (deynta) ay Dowladdu dammaana-qaaddo ila qaddar dhan labaatan jibbaar raasumaalkeeda. Waxaa kale oo ay u idman tahay in ay gasho ammaah ku dherersan waqti dheer iyo xataa maalgelin dibedeed, oo ay kaabeeyso dammaana-qaad dowladeed.

Waajibaadka-deyn, ee kor ku xusan, xataa xagga wixii lacag-hormarin ah oo ay bixinayaa Wakaalado u-idman, waxaa lala mid dhigayaa waraaqaha guud oo deymaha ku cillan yihiin oo ay Dowladdu dammaanad-qaaddo.

Wakaaladdu waxa ay u-idman tahay in jideyso ayna qaaddo xuquuq khaasa oo ah khidmad adeegyo la fuliyey.

Wakaaladdu waxaa kale oo ay Dowladdu u-idmi kartaa in ay qaadato xataa dakhli ay leedahay isla Dowladda. Gebi ahaan ama qayb ahaan.

Qod. 4

Qoraallada mucaamalada nooc kasta oo ay yihiin, oo loo galay (guntay) xagga dhisidda iyo ka-shaqaysiinta Wakaaladda, waxa ay leeyihiin canshuur-dhaaf dhammeystiran (buuxa).

Qoraalladaas waa in loo qaato in ay ku jiraan kuwa la xiriira soo-saaridda iyo baabiinta wajibaadka xagga deynta, iyo weliba diiwaangelinnada, wax-dhimidda iyo tirtiridda wixii rahan maguurto ah, xataa haddii rahantu tahay mid ay dhigeen dad saddexaad oo dammaanad-qaadaya

waajibaadyada deymeed oo horey loo soo sheegay iyo hawl xagga xisaabaha lacagaha.

Isla canshuur-dhaafkaas waxaa xaq u leh qoraallada deymaha ku-cillan yihiin iyo wixii dulsaar loo aqoonsan yahay.

Qod. 5

Wakaaladda uu maamulo Gole Maamul oo ka kooban toddoba xubnood, oo uu ku jiro Guddoomiyuhu, oo laga magacaabay (cayimay) Xeerka Wasiirka xagga Arrimaha Dhaqaalaha, markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada.

Xeerka (Dastuurka) Wakaaladda waxaa diyaarinaya Golaha Maamulka, waxaana lagu ansixinayaa Xeer uu soo-saaro Wasiirka arrimaha Dhaqaalaha iyo is-af-garad kala yeeshay Wasiirka Arrimaha Lacagaha.

Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha oo is-af-garad la yeeshay Wasiirka Arrimaha Lacagaha, waxa uu u-idman yahay in uu xeerar kuwiisa ku soo saaro góaminta habraaca la xiriira dhisidda “aagga xorta” ee Kismaayo, wixii tas-hiilaad ah oo ku wajahan in la dhiirrigeliyo horumarka dekedda iyo wixii kale oo lagama maarmaan u ah gaaridda ujeedooyinka (ahdaafta) ku xusan Qod. 2aad.

Qod. 6

Kor-joogtaynta maamulka Wakaaladda waxaa laga raba Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha, kaas oo u-idman in uu xeer ku soo saaro xeerarka lagama maarmaanka u ah hirgelinta sharcigan,

Qod. 7

Sharcigan waxa uu dhaqangelayaa maalinta isgaas lagu nashriyo Faafinta Rasmiga, ee Soomaaliya.

Sharciga waxaa la gelinayaa Uruurinta Rasmiga, ee sharciyada, waxaana lagu nashrinyaa Faafinta Rasmiga. Qof kasta ooku leh waxaa lagu khasbayaa in uu dhowro una dhowro sida sharci ay leedahay Soomaaliya.

Taariikhda Muqdisho, maanta oo ah 26ka disember 1958.

Maamulaha

Mario Di Stefano